

Teraabiyada haddalka

Teraabiistaha haddal baristu wuxuu baaraa oo baxnaaniyaa caruurta haddalka, luuqadda iyo kominikayshanku ku addag tahay. Ujeedada teraabiyada haddal barista laga leeyahay waxa ay tahay in la xoojiyo ama kor loo qaado ilmaha haddalkiisa iyo horumarka luuqdiisa garshada la xiriirta, waxay kaloo ujeedada laga leeyahay tahay in laga hortago in ilmaha waxbarashadu ku adkaato. Teraabiyada hadal baristu waxay ilmaha haddii loo baahdo u sii gudbiyaan in baaridtaanadiisa meelo kale laga sii wado.

Teraabiyada haddal baristu waxay qayb ka tahay daryeelka caafimaadka ee bulshada fiinlaandayska ah, waxaana taga xarumaha teraabiyada haddal barista caruuro fara badan oo ka mid ah da'da aan wali iskool dhigashada gaarin. Teraabiyada haddal baristu waa addeeg lacag la'aan ah.

Ilmaha waxaa teraabiyada haddal barista usoo gudbiya xanaanooyinka caafimaadka dhalaanka. Waalidka laftigoodu way soo wici karaan teraabiyada haddal barista, haddii uu jiro walwal iyo walaac ay ka qabaan ilmahooda hadliddiisa iyo horumarkiisa luuqadeed.

Teraabiyada haddal barista ilmaha horumarintiisa luuqaddeed waxaa loo addeegsadaa ama loo kaashadaa noocyo kala gedisan oo ciyaaro ah iyo gaymam iyo shaqooyin yaryar oo la qabto. Waxaa intaas dheer oo



teraabiyada haddal baristu ay qoyska siiyaan laylisyo guriga
loogu talagalay oo ilmaha iyo waalidku isla sameeyaan.
Teraabiyada haddal barista waxaa ilmuhu halkii mar joogaan
45 daqiiqo. Ilmuhu teraabiyada haddal barista kaligiis ayaa
jooga ama waalidka ayaa la gala oo la jooga. Teraabiyada
haddal barista waxaa la qabtaa turjubaan haddii loo baahdo.
Teraabiyada haddal baristu inta jeer ee ay noqonayso iyo
waxa ilmaha la barayo waxaa si wada jir ah loogala
heshiiyaa waalidka hadba inta baahida ilmuhu qabaa le'eg
tahay.

Waxaa wada shaqayni ka dhexaysaa magaalooyinka Espoo,
Helsinki, Jyväskylä, Kauniainen iyo Vantaa
teraabiyooyinkooda haddal barista

